

Talo ku socota Khaniisadda, Khaniiska, Labeebka iyo Jinsi bedelaha (LGBT) qaxootiga ah Scotland.



scottish
refugee
council

Abriil 2011

LGBT - Somali

Waxaanu qiimaynaa kaladuwanaanshaha dadkoo dhanna isku si ayaan ula Macaamilnaa. Nasiib xumo, dadka qaar waxa laga yaabaa inay dhibi kasoo gaadho midab kala sooc iyo/ama handadaad sabato ah doorashadooda galmada awgeed ama jinsiga ay yihiin (aqoonsiga jinsiga). Hadday dhibi kaa soo gaadho nacayb, handadaad ama saxariirin ooy ugu wacan tahay adigoo ah khaniisad, khaniis, labeeb ama jinsi bedele (LGBT), ood jeceshahay inaad ku andacooto magangalyo-doon UK tan darteed, warqaddani waxay ku siinaysaa macluumaad ku saabsan halkaad caawimo, talo iyo macluumaad ka heli kartid.



Heshiiskii Qaxootiga 1951 wuxuu sheegayaa:

“qof kastoo – cabsi uu ka qabo darteed in la saxariiryo sababtoo ah qoomiddiisa, diintiisa, waddankiisa, xubin ka noqoshada koox gaara ama afkaar siyaasadeed ku sugan debadda waddankiisa, oon awoodi karin ama, cabsida darteed, aan jeclayn inuu ka faa’idaysto ilaalinta waddankaas”

Ilaa dhawaanahan way ku adkayd dadka ah khaniisadaha, khaniisyada, labeebyada ama jinsi bedelaha (LGBT) inay caddeeyaan inay buuxiyeen shuruudda kor ku xusan ee ku andacoodka magangalyo-doon UK. Luulyo 7 2010 go’aan Maxkamadda Sare oon loo kala hadhin (oo xukumaya) – HJ (*Iiraan*) iyo HT (*Kamaruun*) v *Xoghaya Guud ee Waaxda Arrimaha Gudaha [2010] UKS 31* – wuxuu ogaaday in haddii dadka loo saxariirinayo doorashada galmadooda darteed waa inuu Xafiiska Arrimaha Guduhu siiya ilaalin. Sharcigani si cad uma sheegayo xaaladaha jinsi bedele laakiin faa’ido ayuu u yeelan karaa. Macluumaad dhammaytiran oo ku saabsan xukunkan waxa laga heli karaa websaaydka Maxkamadda Sare ee UK:

http://www.supremecourt.gov.uk/docs/UKSC_2009_0054_Judgment.pdf

maxaa go’aankan Maxkamadda Sare ugu dhigan yahay khaniisadaha, khaniisyada, labeebyada ama jinsi bedele (LGBT)?

Haddaad raadinayso ilaalin ooy sababtu tahay doorashada galmadaada ama jinsiga aad tahay (aqoonsiga jinsiga), waxa jira hadda kiis sharci oo dheeraad ah oo ku caawin kara. Waxa muhiima inaad xasuusnaato in inkastoo caqabadii dalabka magangalyo-doonka marka tan la eego la qaaday, markasta lagaaga dammaanad qaadi mayo magangalyo UK.

Maxkamaddu waxay xukuntay in khaniisadaha iyo khaniisyada magangalyo-doonka ah aan laga filin inay iskaga ilaaliyaan in la dhibo marka waddankooda ay joogaan iyagoo qarabaya doorashada galmadooda. Xukumidani waxay ku adkaysay Xafiiska Arrimaha Gudaha inuu ku doodo inaad badbaadi lahayd haddaad ku noqoto waddankaagii ood qarabaya lahayd xaqiiqda ah inaad tahay khaniisad, khaniis, labeeb ama jinsi bedele.

Heshiiska isbahaysiga buuxa ee Dawladda UK ee hadda ee la daabacay 20 Maayo 2010 waxa ku jira bayaankan soo socda:

“Waanu joojin doonaa dib u dhoofinta magangalyo-doonka kuwaas ay tahay inay ka baxaan waddamo gaara sababtoo ah doorashada galmadooda ama aqoonsiga jinsiga oo badaya khataraha cad cad ee xabbisidda, jidhdilka ama dilka.”

Maxay tahay inaan sameeyo haddii aan ahay khaniisad, khaniis, labeeb ama jinsi bedele (LGBT) oo la igu dhibayo waddankayga doorashadayda galmo ama aqoonsiga jinsigaaga dartii?

Haddii lagu saxariyey doorashadaada galmada ama aqoonsiga jinsigaaga dartii, waa inaad:

- Tan u sheeg Xafiiska Arrimaha Gudaha **sida ugu dhakhsaha badan ee suurogal ah**. Inkastoo tani adkaan karto, haddaanad tan uga sheekayn iyaga, in lagu rumaysto ayaa adkaan doonto tanna waxay ku yeelan kartaa cidhid xun guusha andacoodkaaga magangalyo-doon.
- Tan la wadaagtaa la taliye aamin ah, sida mid ka mida hawl-wadeenadayada, la taliye urur qaxooti oo kale ama wakiilkaaga sharciga. La taliyahaagu wuxuu heegan u yahay inuu ku caawiyo wax kasta ood u sheegtaana waa sir. Waa inay sidoo kale awoodayaan inay gartaan xirfadleyaasha kale ee ku caawin kara.
- Heshaa ama doorataa wakiil sharci oo xog ogaal u ah kiisaska khaniisadaha, khaniisyada, labeebka ama jinsi bedeleha (LGBT). Haddii aanu waayoaragnimo u lahayn qaybtan, hubso inay ka war hayaan kiiska sharciga sida sare lagu sheegay.

Ayaa i caawin kara?

Hay'adaha qaxootiga iyo kooxaha qaybta iskaa wax u qabso

Hay'adaha qaxootiga, sida Scottish Refugee Council, iyo kooxaha iskaa wax u qabsada kale – ooy ka mid yihiin ururada khaniisadaha, khaniisyada, labeebka ama jinsi bedeleha (LGBT) – ayaa kaa caawin kara inaad hesho macluumaadka iyo taageerada aad u baahan tahay. Tan waxa ku jiri karta helidda kooxaha wax taageera ee sharciga, caafimaadka ama bulshada. Sidoo kale waxay ku caawin karaan haddaad la dhibban tahay nacayb ama midab takoor, tusaale, hooygaaga ama guryeyntaada ah.

Hay'adahan iyo kooxahani iyagoo ixtiraamaya sirahaaga kala sheekaysan maayaan macluumaadka kugu saabsan qofna ilaa aad u oggolaato. Qarsoonaanta waxa sidoo kale dabakha tarjumaanada; waa inay si xirfadle u dhaqmaan ooyna kala sheekaysan macluumaadkaaga cidna. Waxaad sidoo kale codsan kartaa tarjumaan xagga tilifoonka ah haddaad ku istareexo inaad dadka kala hadasho tilifoonka.

Liiska websaaydo kale oo waxtar leh:

Equality Network

www.equality-network.org/Equality/website.nsf/home?OpenForm

LGBT Youth Scotland

www.lgbtyouth.org.uk

Stonewall Scotland

www.stonewall.org.uk/scotland

Scottish Transgender Alliance

<http://www.scottishtrans.org/>

UK Lesbian and Gay Immigration Group

32-36 Loman Street, London, SE1 0EH

Tilifoonka: 0207 922 7811

<http://www.uklgig.org.uk/asylum.htm>

Tabinta handadaadda

Sidoo kale bilaysku aad ayuu waxtar ugu leeyahay taageeridda khaniisadaha, khaniisyada, labeebka ama jinsi bedelaha (LGBT). Waxa dhici karta inaad la xidhiidho Sarkaalkooda Isku xidha LGBT.

Haddaanad awoodin ama jeclayn inaad bilayska toos ula hadasho, waxaad isticmaali kartaa qorsheha tabinta qofka/shayga saddexaad oo qarsoon. Tani waxay kuu oggolaanaysaa inaad u tabiso handadaadda mutadawac tabobaran oo jooga wakaaladda sida Scottish Refugee Council (0800 085 6087). Qofku wuxuu qori doonaa dhammaan tafaasiisha aad siiso dabadeedna waxaad dooran kartaa bal haddaad jeceshahay in bilaysku baadho.